

# Buuxinta waajibaadka shaqo-raadinta



Ujeeddada waajibaadka shaqo-raadinta waa in lagu hago qofka shaqo raadinaya inuu si firfircoon uga qaybqaato suuqa shaqada, inuu sahmiyo fursadaha kala duwan ee shaqo-helidda isla markaana uu ka faa'iidaysto habab shaqo-raadin oo kala geddisan.

## Guud ahaan waajibaadka shaqo-raadinta waxaa lagu buuxiyaa adigoo codsanaya shaqooyin

Qofka shaqo-doonka ah isagaa dooran kara fursadaha shaqo ee uu codsanayo, haddii uu tixgeliyo qodobadan soo socda:

1. **Shaqadu waxay qiyaas ahaan soconaysaa in ka badan laba toddobaad.**
2. **Dabeecadda shaqadu waxay waafaqsan tahay awoodaha, xirfadaha, iyo shahaadooyinka qofka shaqo-doonka ah.**

- Qofka shaqo-doonka ah wuxuu shaqo ka raadsan karaa kanaallo kala duwan, sida inuu ka jawaabo ogeysiisyada shaqada ee ku qoran Työmarkkinatori ama inuu ka baadho shaqooyinka qarsoon isagoo adeegsanaya xiriirradiisa.
- Qofka shaqo-doonka ah wuxuu shaqo ka codsan karaa isagoo adeegsanaya habab kala duwan, sida dukumentiyo elektaroonik ah, wicitaanno taleefan, booqasho goobta shaqada, ama ka qaybgalka munaasabadaha shaqaaleysiinta ah.
- Haddii shaqo-doonuhu ka helo hay'adda shaqaalaha ogeysiis ku saabsan shaqo bannaan, markaas isagoo codsanaya shaqadaas wuxuu sidoo kale ku buuxin karaa waajibaadkiisa shaqo-raadinta.

## Waajibaadka shaqo-raadinta laguma buuxin karo:

- adigoo ku biiraya adeegyo, sida waxbarashada, koorsooyin ama tababbarro.
- adigoo codsanaya shaqada ay hay'adda shaqadu kuu tilmaantay.
- adigoo soo bandhigaya profile-kaaga shaqo-raadinta ee Työmarkkinatori.

## Tallaabooyin kale oo buuxiya waajibaadka shaqo-raadinta

Waxyaalahan waxaa wanaagsan in shaqo-doonuhu kala hadlo shaqaalahiisa, si uu u helo tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan siyaabaha kala duwan ee loo buuxin karo waajibaadka shaqo-raadinta.

- Diiwaangelinta diiwaanka shaqaalaha ee shirkad ku shaqaysa kireynta shaqaalaha.
- Codsashada deeq shaqo si loogu shaqeeyo.
- Tallaabooyinka la taaban karo ee la xiriira bilaabidda ganacsiga, sida diyaarinta qorshaha ganacsi.
- Raadinta fursadaha shaqada ee la qaban karo adigoo ganacsade ah, tusaale ahaan la xiriiridda kuwa shaqada bixin kara iyo ka qaybgalka tartamada dalabyada.
- Codsashada fursadaha shaqo ee ka gaaban laba toddobaad. (*Tani waxay khusaysaa xaaladaha ay shaqo-raadintu sababo gaar ah awgood ku dhammaanayso saddex bilood gudahood.*) Arrintan waxaa si gaar ah loogu heshiinayaa qorshaha shaqo-helidda ama qorshe kale oo beddelkiisa ah.
- Inaad ka codsato loo-shaqeeyahaaga saacado dheeraad ah. (*Tani waxay khusaysaa dadka shaqeeya waqti-dhiman iyo kuwa ku shaqeeya heshiiska 0-saac.*) Tallaabadan, waajibaadka shaqo-raadinta waxaa lagu buuxin karaa hal mar inta lagu jiro muddada kormeerka ama haddii ay jiraan shaqooyin dhowr ah, waajibaadka shaqo-raadinta waxaa lagu buuxin karaa hal mar loo-shaqeeye kasta.
- Daabacaadda faylalka shaqada, shahaadooyinka shaqada ama muuqaalka shaqo raadinta internet-ka tusaale ahaan LinkedIn. (*Tani waxay khusaysaa tusaale ahaan xirfadlayaasha iyo farshaxanlayaasha, kuwaas oo shaqo-heliddoodu u baahan tahay isku-xirnaan iyo dhisidda shabakadaha.*) Tallaabadan, waajibaadka shaqo-raadinta waxaa lagu buuxin karaa hal mar oo keliya sidaas darteed daabicidda shaqo-raadinta oo si isdaba-joog ah loogu soo celceliyo isla madal isku mid ah ma buuxinayso waajibaadka shaqo-raadinta.